



“Lacagta u soo Noqonaysa Kiraystaha” iyo Lacagta Canshuurta Guryaha ka soo Noqota

“The Renter’s Refund” and Property Tax Refund

Waxaa maxay lacagta u soo noqonaysaa kiraystahu (Lacagta Canshuurta Guryaha Ka Soo Noqota)?

Qaar badan oo ka mid ah kirystayaasha iyo mulkiilayaasha guryaha lehi waxa ay heli karaan lacag uga soo noqota sannad walba gobolka Minnesota. Cadadka lacagta ah ee kuu soo noqonayaa waxa uu ku xiran yahay:

- inta ay ahayd kirada ama canshuurta guryaha ee aad bixisay
- dakhligaaga iyo
- inta qof ee aad mas’uulka ka tahay



Ciddee ayaa heli lacagta soo noqonaysa?

Waxa aad heli kartaa lacag kuu soo noqota hadii:

- Aad guri kiro ah ku jirtay dakhliga guud ee qoyskaaga ee sannadka 2024 uu ka yaraa \$75,390 (xaq u yeeladka dakhliga ku xiran kor buu sii aadaa mar walba ay sii korodho dadka canshuurta lagu xareystaa)

AMA

- Aad adigu guriga aad ku jirto aad leedahay dakhligaaga guud ee qoyskaaguna sannadka 2024 uu ka yaraa \$139,320 (xaq u yeeladka dakhliga ku xiran kor buu sii aadaa mar walba ay sii korodho dadka canshuurta lagu xaraystaa) **iyo**
- Aadan ahayn qof uu canshuurta-celinta dowlada dhexe uu ku xaraystay qof kale sannadkii 2024, **iyo**
- Aad 2024 sannadka oo dhan ama sannad qaybtii aad deganayn Minnesota **iyo**
- Aad kiro ka bixisay dhisme la canshuuray **AMA** aad gurigaaga aad adigu leedahay.

Ogow: Hadii aad guri leedahay waa KHASAB inaad leedahay lambar sooshal sakuurati (social security) oo sax ah si aad u hesho lacagta canshuurta guryaha ka soo noqota. Haddii aad tahay kireyste, waa khasab inaad haysato lambar sooshal sakuurati oo shaqeynaya (social security) ama lambar aqoonsi canshuur oo shakhsian ah oo shaqeynaya (ITIN).

Siddee ayaan ku helaa lacagta ii soo noqonaysa?

- **Hadii guriga aad ku jirtaa uu kiro yahay**, qolada guriga iska lehi waa khasab inay ku siiyaan Warqad ay ku qoran Kirada la Bixiyey (CRP) ugu dambayn bisha Janaayo 31, 2025. Laga bilaabo canshuur-xareysiga 2024, waxa aad u baahan tahay inaad ku buuxiso waxa la yiraa Jadwal *M1RENT (Schedule M1RENT)* Canshuur-Celinta Dakhliga ee Minnesota si aad u hesho kiridhidka kiraystaha. Waagii hore, waxay ahayd inaad buuxiso foomka gooni ah oo ah *foomka M-1PR, (Form M-1PR)*.
- **Hadii aad guriga adigu leedahay**, isticmaal Oraahdaada Canshuurta Dhulka. Hel foomka goonida ah ee canshuurta ee la yiraa *foomka M-1PR (Form M-1PR) ee 2024*, ee *Lacagta ku soo noqota Guriga Deegaanka ah (mulkiilayaasha)*.
- Haddii aad leedahay guri ah guryaha la qaado ama aad kiro ka bixiso goobta aad guri dhigato, isticmaal *foomka M-1PR (Form M-1PR)*, si aad u sheegato lacagta canshuurta dhulka ka soo noqota. Siddoo kale, xareyso waxa la yiraa *Jadwalka M1RENT (Schedule M1RENT)* si aad u sheegato kiridhidka kiraystaha ee kiradda goobta aad guriga dhigato ee kiradda ah.
- Waxa aad wici kartaa khadka (651) 296-3781 si aad u hesho foom ama waxaad warqad u diri kartaa: Minnesota Tax Forms, Mail Station 1421, 600 N. Robert St., St. Paul, MN 55146-1421.

Sidoo kale waxa aad ka heli kartaa foomamka oo dhan iyo akhbaarta la xaraysanayo shabakada (online) www.revenue.state.mn.us.

- Haddii aad tahay mulkiile guri oo xareysanaya *foomka M-1PR (Form M-1PR)*, aadna doonayso inaad ku xareysato boostadda, buuxi foomka, ka dibna dir. Marka ugu dambaysa ee la xareysan karaa waa bisha Ogoosto 15, 2025. Ku hagaaji ciwaanka ah:

Minnesota Property Tax Refund

Mail Station 0020
600 N. Robert St.
St. Paul, MN 55146-0020

- Waa inaad ku hesho lacagta kuu soo noqonaysa 60-cisho gudahood ka dib kolka aad xareyso ama ka dib bisha Sebteembar 30 ka dib mulkiilayaasha guryaha. Haddii aad mulkiile guri tahay hadba tii dambaysa.
- Waxa aad ku heli kartaa lacagtaada kuu soo noqonaysa 30 cisho ka sii hor haddii aad:
 - Kumbuyuutarka ku xareysato
 - Aad doorto in lacagtaada toos loogu soo diro. Taa macnaheedu waa lacagta si toos ah ayaa akoonkaaga bangiga loogu soo ridi.
 - Ku dar dhamaan qoraaladda loo baahan yahay. Kuwaa waxaa ku jira warqadda la yiraa CRP haddii aad guri kiro ah ku jirto.

Mulkiilayaasha guryahu waxa ay xareysan karaan *Foomka M-1PR (Form M-1PR)* ilaa 1 sanno ka dib kolkii la rabay inay xareystaan. Si aad u sheegato lacagta canshuurta kirada ku soo noqota ee 2024, waxa aad haysataa ilaa iyo bisha Ogoosto 15, 2026 si aad u xareysato.

Ka waran hadii qolada gurigu aysan i siin warqada lacagta canshuurta ee (CRP)?

- Wac qolada guriga kana codso warqada. Hadii ay taasi shaqeyn waydo, warqad u qor qolada guriga aad ku waydiisanayso ugana sheeg iyaga warqada in loo ganaaxi karo \$100 warqad (CRP) kasta oo lacagta kirada ka soo noqoto lagu dalbado oo aysan bixin. Sheeg cadadka kiradda ee aad bixisay sannadka. Nuqul kala har warqada aad dirayso.
- Hadii qolada guriga aad uga jirtaa aysan wali ku siin waydo warqada lacagta kirada ka soo noqoto lagu dalbado (CRP), kolkaa ka wac Waaxda Canshuuraha (Department of Revenue) khadka ah (651) 296-3781. Ka dib waydiiso inay la xiriiraan qolada guriga ayna ganaaxaan hadii qolada gurigu ay kuu soo diri waydo warqada adiga.
- Waaxda Canshuuraha (Department of Revenue) waxa ay ku siin kartaa adiga Foomka Dhaarta Kirada la Bixiyey ah (Rent Paid Affidavit) si aad u buuxiso intii aad sugi lahayd warqada (CRP). Waxa aad u baahan tahay rasiidyo ama wax kale oo cadeyn ah oo ku saabsan inta ay ahayd kirada aad bixisay. Hadii aadan rasiidyo haysan isticmaal hesiishka liiska guriga, warqado guriga kuugu soo dhacay, ama wax kale oo cadeynaya inaad halkaa ku noolayd aadna kiro bixin jirtay. Hadii aad cadeyn karto inaad halkaa ku noolayd, iyo waxa cadadka lacagtu uu ahaa, ku mudac in gobolku uu ka soo qaado in kirada la bixin jiray.

Xaggee ayaan ka heli karaa caawimaad ku saabsan foomamka canshuurta?

Hadii aad uu dakhligaagu hooseeyo, ama aad naafo tahay, ama aad tahay waayeel, waxa aad heli kartaa caawimaad lacag la'aan ah. Si aad u hesho rug caawimaad fidisa oo kuu dhow, ka wac Waaxda Canshuuraha (Department of Revenue), khadka ah (651) 297-3724 ama ka wac hay'ada United Way, lambarkeeda gobolka oo dhan ah, ee ah 2-1-1.



Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.